



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**  
**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**  
**KU SAABSAN**  
**AMNIGA DALKA.**

A handwritten signature in blue ink, located in the lower right quadrant of the page.

**Mogadishu, 5<sup>th</sup> Maarso 2016**

## GOLAHA SHACABKU:

- Ka dib:** Dood dheer oo ku aaddan qiimeynta xaaladda amniga dalka;
- Ka dib:** Xog-wareysi iyo su'aal oraaheed uu la yeeshay Raysal-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya, Wasiirka Amniga Gudaha, iyo Taliyeyaasha Ciidanka;

Wuxuu Goluhu soo jeedinayaa talooyin iyo aragtiyo ku aaddan xoojinta amniga Qaranka;

1. Waxaan Xukuumadda u soo jeedineynaa inay soo nooleyso ku dhaqanka Sharci No. 8 ee soo baxay 30<sup>kii</sup> Maarso 1965 (Nidaamka Xaqsiinta xubnaha Ciidanka Qalabka Sida iyo Dadka ku waxyeelooba ama ku geeriyooda difaaca dalka), iyo shuruucdii ka dambeysay isla markaasna dhisto Hay'ad Qaran oo Madaxbannaan oo fulisa sharcigan si loo daryeelo ciidanka, agoonta ciidanka iyo dadka Shacabka ah ee ku waxyeelooba difaaca dalka;
2. Waxaan Xukuumadda ugu baaqeynaa inay joogteyso mushaharka iyo xuquuqda Ciidanka iyadoo la qadarinayo darajada Ciidanka;
3. Waxaan Xukuumadda u soo jeedineynaa in ay dib u qiimeyn ku sameyso mushaharka Ciidanka iyada oo la qadarinayo maciishada dalka;
4. Wuxuu Golaha Shacabka ka sugayaa Xukuumadda Siyaasadda Amniga iyo Siyaasadda Difaaca Qaranka kalfadhiga soo socda,
5. in dib-u-eegista Miisnaaniyadda lagu soo daro miisnaaniyad loogu talagalay xuraanka iyo hawlgallada lagu adkeynayo amniga.
6. Wuxuu Golaha Shacabku Xukuumadda farayaa in ay la timaado la xisaabtan saraakiisha ka soo saaray Ciidanka Qaranka degmooyinka qaarkood, taasi oo kaliftay inay nabad-diidku khalkhal galiyaan deegaamada dowladu ka taliso, waxaa xukuumadda laga sugayaa in kalfadhiga soo socda Golaha Shacabka horkeento siyaasadda isku dhafka Ciidanka.
7. Waxaan Xukuumadda ku adkeyneynaa in laga hawl galo isku furka jidadka isku xira degmooyinka dalka si go'doonka looga saaro degmooyinka haatan ku jira cunaqabateynta;



8. Waxaan Xukuumadda ka sugaynaa kalfadhiga 8aad in ay soo diyaariso Siyaasad ku aaddan ciidamada ka soo goosta Al-Shabaab iyada oo xoogga la saarayo dhaqan-celintooda iyo daryeelkooda;
9. Waxaan Xukuumadda ugu baaqeynaa inay ka taakuleyso dhinac walba deegaanada ay ka hawlgalaan ciidamada madaniga ah ee dowladda taabacsan;
10. Waxaan sidoo kale Xukuumadda ugu baaqeynaa inay soo diyaariso hanaan lagu mideeyo tababarada kala duwan ee Ciidamada lagu siiyo dalalka kala duwan;
11. Waxaa Xukuumadda lagu adkeynayaa inay hubiso kala soocidda xilalka iyo waajibaadka Maxkamadda Ciidanka Qalabka Sida iyo Maxkamadda Madaniga ah iyada oo maxkamadda Ciidanku ka reeban tahay maxkamadeynta dadka Rayidka ah;
12. Golaha Shacabku wuxuu u heelan yahay la shaqeynta hay'adda Fulinta iyo hay'adaha amniga iyada oo loogu baaqayo in loo hoggaansamo u yeeridda mas'uuliyiinta si Golaha Shacabku uga guto waajibaadka dastuuriga ah ee kormeeridda iyo korjoogteynta hay'adaha fulinta ee heer Qaran, iyadoo ciddii u hoggaansami wayda uu Golaha Shacabku xaq u yeelanayo dib-u-eegista xilkooda si waafaqsan qod. 69aad ee Dastuurka.
13. Waxaan Xukuumadda iyo laamaha amniga faraynaa in la xoojiyo wada-shaqeynta hay'adaha dowladu la leeyihiin dhamaan qeybaha bulshada si loo xoojiyo amniga, loona baahiyo ilaalinta nabadgaliyada;
14. Waxaa laamaha amniga la farayaa inay shacabka u cadeeyaan hanaan cad iyo cinwaano shaqeeya oo ay la soo xiriiri karaan si ay uga qayb qataan adkeynta amniga
15. Wuxuu Golaha Shacabku dhiirigalinayaa Ciidanka Qalabka Sida dhamaantiis si ay u gutaan waajibaadkooda annaga oo u taagan ilaalinta iyo difaaca xuquuqaha

M. ne Mahad Cabdalle Cawaad  
Guddoomiye K/X/2aad BJFS,  
K/Simaha Guddoomihaya BJFS.

